



qofka khayrka dadka tusa wuxuu leeyahay ajar la mida kan khayrka sameeyey ajarkiisa

Abii Mascuud Alansaarii Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: Nabiga scw nin ayaa u yimid wuxuuna yiri: waan gaadiid beelaye gaadiid i saar, wuxuu ku yiri Nabigu scw: "kuuma heli karo", nin kalaa yiri: Rasuulkii Ilaahayow, anaa tusaaya qof saara, Rasuulka Ilaahay scw wuxuu yiri:- "qofka khayrka dadka tusa wuxuu leeyahay ajar la mida kan khayrka sameeyey ajarkiisa".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nin ayaa u yimid Nabiga scw wuxuuna ku yiri: gaadiidkaygii ayaa iga dhintaye, i fuuli gaadiid, oo i sii waxaan fuulo oo i gaarsiiya, wuuna ka cudur daartay Nabigu scw inaanu hayn shay uu fuuliyo, nin kale oo joogay ayaa yiri: Rasuulka Ilaahayow, anaa tusaya qof fuuliya, markaasaa Rasuulku scw u sheegay inuu ajarka la wadaagayo kan wax sadaqaystay waayo wuxuu tusay qof u baahan.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/5354>

